Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadalqoraalka kalfadhiga 3-aad
Documentiga Kol 3-aad F/25-aad/2013 **03/11/2013**

Kalfadhiga 3-aad
Kulankiisa 25-aad sac. Fur. 11:25Gh, sac xir. 12:50Gd
Guntinta:-165
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka karimka**
2. **Ansixinta ajendaha**
3. **Doodii heshiiskii Favori (socotey)**
4. **Warbixinta IPU soo jeedin Qaalid Cumar Cali**

Shir=guddoomiyaha Guddoomiye Mudane: Maxamed Sh: Cusmaan Jawaari

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari. Waxaana lagu furey Aayadaha Quraanka kariimka waxaana akhriyey Xill: Sheekh Shaacir, Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada weydiistey iney ajendaha ansixiyaan weyna ansixiyeen.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa sheegey doodii Favori intii Shaley harsaneyd in la dhameystiro lana soo gunaanado. Intaa kadib ayaa yiri xil: saado ayaa I weydiisatey iney tix yar oo Murti ah tiriso

Billaahi wuxuu u marey in dalka beylah iyo bililiqo ka celiyaan
Billaahi wuxuu u marey iney baddeena ka ilaashaan baal kastaba
Billaahi wuxuu u marey Bahalkii haweysta booca iney ku dhagaan iyo gafuurka
Baarlamaanka Waa wadani Bulshada Qaarkeed yahay badi waa wada xalaal
Jeebkooda ma buux sadaan badi waa wada xalaal.
Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada ku war galiyey su'aalaha la weydiinayo wasiirka hadal uu soo noq noqon waayo waxaan waa dood.

Xill: keynaan: waxaan soo jeedinayaa heshiiska Favori wuxuu ka kooban yahay 13-qodob waxa uu ahaa mid heer sare ah wasiirkana wuxuu muujiyey dadaal badan wax badan waa qabtey sida saadaasha hawada, Boostada iyo isgaarsiinta, dayuuradii Soomaali Airline soo celinteedii iyo guryihii ay laheyd Somali Airline, Qod:98 waxa uu Sheegayaa in heshiiska ka bixi karaan, waxay u baahan tahay Qareen iyo Quburo si fiican u yaqaana Heshiiska goorta la galayo iyo goorta laga baxayo, shirkada Favori in aan fiirino iney wax ka qaban karto Arimaha aan hiigsaneyno, waxaan codsanayaa in maanta la an sixiyo heshiiska Favori.

Xil: Xuseen warsame samater: waxa uu soo jeedyey heshiiskan markii la qiimeeyo inuusan dheeli tirneyn heshiiskan wuxuu u egyahay mid 90% xaglinaayo, waqtiga la qabtey wey dheer tahay waa in laga dhigaa muddo 5-sano ah waayo shirkadaha waxay ka faa'ideystaan wadamada burburka ku dhacey sida anagoo kale shirkadaan hadey ka baxdo heshiiska waxey qaadaneysaa agabkeeda.

Xil: Cabdi Cali: waxaan soo jeedinayaa inuu dayacan yahay amniga Garoonka iyo magereshanka wasiirka arimaha gudaha wax haka qabto, waxaa adag sidii looga furfuri lahaa amisom, hadda ka hor shirkadii soomaali furuud anaga waxaan laheyn 51% Qolada kalena waxey lahaayeen 49% oo la dhoofin jirey muuska, Heshiiskaan lala galey shirkadda favori lacagta malyan iyo barka ah hadda lama celinaayo waxaa la celinayaa markii heshiiska dhamaado oo lakala guuro Shaqaalaha la qorayo waa iney 80% soomaali ahadaan inta kale waa iney u keen sadaan farsamo inta soo harteyna waa in la sameeyaa canshuur dhaaf qof walba oo muwaadin ah waa in la siiyo ahmiyad.

Xil: Ibraahin Deyfullaah: waxaa soo jeedinayaa inaan nahay dad muslim ah, wasiirka waa dadaaley dhibaato faro badan ayuu soo marey, heshiiskaan la kala saxiixdey 45% in aan anaga leenahay 55% iyaga leeyihiin waa waxaan munaasab aheyn dowladda turkiga waxaa naga dhexeeya wanaag badan inaan barri ka maalin is jii-jiidano waa laga fiican yahay shaqaalaha horey ugu dayacnaa xuquuq dooda hala siiyo.

Guddoomiyaha ayaa wuxuu ku soo dhaweeyey wasiirka Mudane: Cabdullaahi Ciilmooge Xirsi: waad mahadsan tihiin su'aalaha ley weydiiyey waxay u badnaayeen talo bixin waana idinka qaadaneynaa su'aasha waxaa ku jirtey in shirkada heshiiska ka bixi karto waa run arintaasi markii aan kala saxiixaney waxaa goob joog ahaa Golaha wasiirada, Qareen, Quburo kale waxay ka koob naayeen shan qof, dhanka dhaqaalaha wey jitaa inaan raadineyno dhaqaale dadka noo yimid waxay wadeen adeeg anagana dhulkii ayaan heysanaa, mudada heshiiska waxay codsadeen 20-sano, anagana mudada waxaan niri mudada 15-sano, xagga amniga waa run waa jilicsan yahay waan dadaaleynaa sidii loo sugi lahaa garoonka iyo magareshanka Dhowr gaarna waan ka wada hadal ney wasiirka arimaha gudaha.

Canshur dhaafka waa qalabka oo kaliya wan kawada hadalney favori.

Dowladii hore ee bur-burtey markii ay dhoofin jirtey muuska mahayo in ay soomaaliya leedahay 51% qolada kalana ay leedahay 49% qofkii hayo hishiiskas ha iikeeno, xaga dibosidka 3sano ugu horeysa in aan la dareemin wax culeys ah ee aan ku shaqeyno si toos ah qalabka Airporka anagaa iska leh wax wal-wal ah kama qabo, dhanka shaqaalaha SKA waxey la tegtey mooye inta kale wey joogan waana soomaali, shaqaalaha ka shaqeeya dalka Kenya wey ku dhiban yihiin, waxey gaarayan 129 shaqaale, mar dhow waan soo wajineyna 01/01/2014 shaqaalaha xoogiisa xagey naga jiran, shaqaalaha inta jooga dhib maqaban waxey ka shaqaaleysan yihiin, wasaarada shaqada iyo shaqaalaha, wasiirka waxa uu yiri waa idiin mahad celinayaa.

Guddoomiyaha ayaa umahad celiyay wasiirka, guddoomiyaha ayaa yiri waxa hishiis lala galayo waa ajnabi wey wanaag santahay in la foojignado,guddoomiyaha ayaa yiri hala fasaxo wasiirka.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa u yeerey Xil: khaalid si uu u akhriyo warbixinta dib u la soo noqoshada xubun-nimadda Baarlamanka aduunka(inter-parliamentary union IPU)

Guddoomiyaha waxa uu sheegey in howshii ay gabo-gabo tahay waa in ay ku wareejiyan dhamaan aaraadii ay soo ururiyen xokeynta guddiga ganacsiga iyo guddiga gaadiidka, waa in ay si dhaqso ugu soo gudbiyan baarlamanka.

XIL.Khaalid: sida aad lasocotan sanadkii 1963-1969kii wuxuu baarlamanka soomaalya xubin ka ahaa Baarlamanka aduunka,waxaa xubin nimada la hakiyay 1969-1991dii iyadoo loo cuskanaayo in baarlamankii xiligaa jirey uusan ku iman si demoqraadi ah, waxaa dib loogu xirmey 2006dii-2008dii iyadoo xiligaa lagu yeeshey lacagtii qaaran sanadeedka oo dhan CHF:65,740, oo ah lacagta swisska oo u dhiganta USD:80,860, markii la bixin waa yay lacagtaa xubin-nimadda Baarlamanka soomaaliya waa la joojiyay sida uu qoraayo Qodobka 5.3 xeer nidaamiyah udegsan IPU.

Xil:Kula-lihi: waxan soo jeedinayaa in an ka tirsanahay Baarlamano fara badan oo an ka midnahay sida,carabta,afrika, islamka, xildhibanka ka qeyb galayo ma 2sano ayaa laga dhigaya.

Guddoomiyaha ayaa yiri shuruu dahooda wey adag yihiin weyna u tafa-tiran tahay ayagaana qoranaaya, kuwa kalana anagaa ka dhigan karna 1sano-2sano, ka dibna waa la bedeli karaa xildhibaanada, waxey yiraahden waa in uu ku jiro hawen iyo dhalinyaro anaga baarlaman ahaan waan sii wadi karnaa waana bedeli karnaa.

XIL:Jamaal: waxa uu soo jeediyay in baarlamanada laga qeyb galayo in xildhibanka hal sano ka dib la bedelo.

Xil:C/raxman suge: waxa uu sheegey dhalin yarada ka qeyb galeyso baarlamanka caalamka, yaa soo xulaaya dhalin yaradas ma 4.5 ayaa lagu soo xulayaa mase aqoon.

Xil: C/qaadir xaashi: wuxuu soo jeediyay dadka nooga qeyb galaya baarlamanka caalamka, waa in ay yihiin dad matali kara soomaali, aqoon leh karateri leh .

Xil:Cabdi Cali: waxa uu soo jeediyay dadka lagu qorayo baarlamanada in lagu doorto aqoon iyo waayo aragnimo, sumcada soomaali-nimo waa in ay dib u soo dhisantaa, dadka halka jooga oo siyaasiyiinta ah lagu doorto aqoon, wayo arag in laga dhigo 1sano.

Xil:Maxamed Cabdi Yusuf: waxa uu soo jeediyay in haweenka ay leeyihiin xuquuq, laakiin maaha in la yiraahdo dhalin yaro waayo ragey ku dhex jiran.

Xil:Nuur: waxa uu soo jeediyay dad na matalaya ma aqoon ayaa lagu soo xulayaa mase 4.5.

Xil:Xeyd: waxaan soo jeedinayaa, waxa layiraahdo 4.5 ma jiraan, dadka la dirayo ee barlamanka caalamka ha lagu soo xulo, aqoon,qibrad,dad xishooda oo edebleh.

Xil:Sey-Sey:waxaan soo jeedinayaa in ay san jirin 4.5 dadka waa siman yahay qof-qof ka wanaagsan ma jirto,dastuurka kuma qorna hadii xeer-hoosadka ku qoran yahay waa lagu dhaqmaa.

Xil:Keynaan: waxaan soo jedinayaa in la soo hadal qaado qodobka 4.5 maaha,guddiyadii la dhisay waxaa lagu dhisey 4.5, dad baan melena heysan oo meel ku qorneyn, dadna meel aysan rabin ayay ku qoran yihiin qabka 4.5 sax maaha Guddoomiye arinta guddiyada wax ka qabo.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa sheegey markii lasa meynayay guddiyada xildhibaan kasto waxan iri keena C.V si aan u arko qof walba meesha uu ku haboon yahay in lagu qoro, hadii aan u qoro 4.5 waxaa imaneysa awood qeybsi, hadhow waxaa la ileeyahay xeerkii ayaad jabisey, markad halkan soo istaagtan waxad leedihiin ma jirto 4.5, xildhibaano runta aan usu sheegno hal meel isku raaca.

Dadka baarlamanka caalamka u baxaya, waxan fiiriyay aqoon waxa soo baxdey dadka qaarkiis oo ah 4.5 oo an aqoon laheyn iyo dadkale, waxaa jirta dad aqoon leh iyo ku aan aqoon laheyn, gudoomiyaha ayaa yiri dadka baxaya iska bax maaha waxaa leyska rabaa qarash anagana maheysano wax qarash ah, xogh'yaha waxaan iri noogu dar miisaaniyada, xildhibaanada baxaya iska bax maahan waa in ay wax soo dhicin karan, ay wax tar soo kordhiyan, wax qabad ayaa loo baahan yahay, iska bax oo dayuurad raac maaha, waxaa la doonayaa in aad hor fadhiisan kartid guddiyada caalamka ee shirarka isgu imanayo, guddiyada in lala xiriiro ayay raban hadii ay xildhibanada iska bixin karaan qarashka.

Intaa ka dib Guddoomiyaha ayaa yiri waa mahadsan yahay xil. Khaalid sidaas ayaa loo baahan yahay qof kasto oo boxo in uu warbixintas oo kale keeno.

Guddoomiyaha ayaa sheegey in ay fooda nagu soo heyso 2014ka, waa in la dhisaa Guddiyada madax banaan, iyo tan gobolada la dhisaa hadii aan hada ka gaar siin waxan noqoneynaa Baarlaman qasaarey, waxaa inoo qorsheysan hanankii geedi socodka, in hal mar laga dodo Axsaabta Siyaasiga, in maxkamada sare lagu sameeyo rifom, in maxkamada dastuuriga la dhiso.

Shir-Guddoomiye Guddoomiyaha Golaha Baarlamanka Mudane:Maxamed Sheekh Cusman Jawaari, uu shir Guddoominayay kal-3-aad kul.25-aad uu sheegey in uu shirka xiran yahay saacada markey aheyd 12:50gd.